## Gunaanudka Qorshaha Sinaanta Dijitalka ee Vermont

**Waa maxay Qorshaha Sinaanta Dijitalka ee VCBB iyo Vermont?**
Guurtida Bulshada Xiriirinta Qadka Vermont (Vermont Community Broadband Board - VCBB) waxaa loo sameyay in ay siiso dadka reer Vermonters (qof walbo oo ku nool Vermont) leysku haleyn karo, tayo-sare leh, qad xiriir la awoodi karo, ama qadka internetka. Internetka waxaa loogu baahan yahay in lagu sameyo wax yaabo badan oo asaasi ah, walxaha maalinlaha ah, sida iskuulka, shaqada, dukameysiga, helida xanaanada caafimaadka, daawashada filimaanta iyo bandhigyada, iyo la hadlida saaxiibada iyo qoyska.

Sharci dajiyayaasha Vermont waxa ay sameyen Guurtida Bulshada Xiriirinta Qadka Vermont si loo siiyo dadka reer Vermont qadka internetka oo leysku haleyn karo misna ah qiimo la awoodi karo. Qadka waa mid tayo sare leh iyo internetka xawaaraha sare leh ee shaqada looga baahan yahay, Iskuulka iyo dukaameysiga. Sidoo kale waxa uu ku haboon yahay muqaal baahinta tooska iyo la hadlida saaxiibada iyo qoyska.

Marke aheyd 2021, Kongreska ayaa meel mariye Sharciga Shaqada iyo Kaabayaasha oo la socoto $42.45 bilyan si loo hubsado in uu qof walbo uu heli karo misna ka faa'iidi karo Internetka. Qeyb kamida lacagta ayaa timid Vermont si loogu sameyo Qorshaha Sinaanta Dijitalka ee gobolka dhan iyo barnaamijka.

Guurtida Bulshada Xiriirinta Qadka Vermont ayaa qortay Qorshaha Sinaanta Dijitalka ee Vermont. Waxaa mar dhaweyd ansaxisay dowlada federalka. Kani waa gunaanudka dulmar ee qorshahaas. Waxaad qorshohoo dhameystiran ka aqrisan kartaa linkigaan" Qorshaha Sinaanta Dijitalka ee Vermont. Haddii aad jeclaan laheyd in aad qorshaha sinaanta dijitalka aad luuqadaada hooyo ku aqriso, waxaad ka codsan kartaa qorshahoo turjuman ayadoon wax qidmad ah lagaa qaadeynin la xiriir Britaney Watson Britaney.Watson@vermont.gov.

**Maxaa laga waddaa "Sinaanta Dijitalka"?**
Waxaa loola jeeda in qof walbo uu xaq sinaan u leeyahay helida tiknolajiyada dijitalka oo loo siman yahay, waxaa kamida ah helida internetka si aad uuga qeyb qaadato bulshada iyo dhaqaallaha Mareykanka.

Sinaanta dijitalka waxaa loola jeeda in shaqsiyaadka iyo bulshooyinku ay heystaan waxa ay u baahan yihiin si ay qeyb uuga ahadaan bulshada iyo dhaqaallaha. Waxaa laga wadaa in qof walbo uu heli karo qadka iyo aalladaha, iyo in ay yaqaanan sida loo isticmaalo.

**Dhibaatada**
Qorshaha Sinaanta Dijitalka ee Vermont.waxaa lagu saleyay faallada shacabka dagan Vermont iyo hayadaha u adeega reer Vermonter. Waxaan dhageysanay dadka reer Vermont anagoo qaadanay kulamo dhageysi, kooxo diirad saarid, iimeylo, qadadka taleefanka, iyo wareysiyo. Waxaan baranay in ay jiraan dhowr caqabadood ama carqaladooyin ka hor jooga dadka in ay isticmalaan qadka internetka.

Waxaan sameynay Qorshaha Sinaanta Dijitalka anagoo ku saleynay waxa ay reer Vermont ka dhaheen. Waxaan qaadnay wareysiyo, wacitaan taleefan, kooxo diirad saarid, iyo kulamo dhageysi shacab. Waxaan baranay in caqabadahan ay yihiin waxa horjoogo cilmiga dijitalka iyo Vermont:

1. Qadka (internetka) oon laga heleynin halka ay dagan yihiin.
2. Qadka (internetka) oo aad qaali u ah.
3. Dadku ma heystaan kombiyutar ama aalad kale ay internetka ka soo galaan.
4. Dadku uma heystaan in ay u baahan yihiin adeega internetka.
5. Dadku ma yaqaanan sida internetka gabi ahaanba si buuxda oo amaan ah loogu isticmaalo.

**Qorshaha**
Qorshaha Vermont waa in lala shaqeyo hayadaha hadaba horay u caawinaya dadka reer Vermont. Waxaan la shaqeyn doona hayadaha gobolka iyo arrimaha bulshada iyo macadyada ee bulshada deegaanka ku qotoma (meelaha sida magaaloyinka ay dadku aadan warbixinta sida maktabadaha, kuleejoyinka, jaamacadaha, shaqooyinka/hayadaha kobaca xooga shaqo, shirkadaha, iyo hayadaha aan dowliga aheyn).

Vermont waxa ay leedahay hayado badan oo caawiyo dadka reer Vermont. Kuwani waxa ay noqon karaan hayadaha dowliga, hayadaha aan dowliga aheyn, shirkadaha, iyo xitaa maktabadaha. Qorshaheenu waa in aan ayaga la shaqeyno si aan sinaanta dijitalka uga dhaqan galino Vermont.

Vermont waxa ay leedahay shan hiigsi si loo gaaro sinaanta dijitalka. Hiigsi walbo hoostisa waxaad ka arki kartaa siyaaboyinka Qorshaha Sinaanta Dijitalka ee Vermont ay iskugu dayi doonto ka gun gaarida hiigsiyadan.

1. Dhisida xiriir ee qadka si dhamaan ciwaanada Vermont ay u helaan qadka internetka oo leysku haleyn karo.
    - Hubsashada in magaallo walbo oo ku taallo Vermont ay ugu yaraan leedahay goob machad ah oo isku keenta bulshada oo laga heli karo adeeg internet xawaaro saro leh oo gigabit Mbps ah.
    - La shaqeynta saaxiibada bulashada iyo bixiyayaasha adeega internetka si loogu xiro qalabka WI-Fi-ga dibada dhismooyinka dadka aan guryaha laheyn ay adeeg ka doontaan (guryaha badbaadada, goobaha raashinka, iwm.).
2. Hubsashada in adeegu yahay mid iswadi karo oo ay bulshadu wado.
    - Leh hab fudud oo ay dadku fikrado inagu siin karaan iyo warcelin ku saabsan adeega Internetka.
    - Hubso in machadka isku keena bulsho walbo uu leeyahay warbixin la heli karo oo ku saabsan adeega sinaanta dijitalka oo lagu heli karo luuqado kala duwan.
    - Barnaamijka amaahinta aallada si marka dadka reer Vermont ay u amaahan karaan kombiyuutar, taablet, ama tijnoolajiyada kaalmada.
3. Hubso in adeega internetku yahay mid la woodi karo.

    - Waxaad la shaqeysa adeeg bixiyaasha internetka si aad u hubsato in ay jiraan barnaamijyo caawinaya in qadka uu noqdo mid la awoodi karo, waxaad hubsataa in lasoo xayeysiiyo, waxaad sidoo kale hubsataa in dadku isticmaalayaan.
    - Waxaad hubsataa in dadku ay wax ka ogyihiin agabka lagu heli karo tijnoolajiyada kaalmada ee dadka cuuryaamada ah.
    - Waxaad hubsataa in guri walbo oo uu dagan yahay arday dugsi sare dhigto in uu qad leeyahay hal tijnoolajiyada kaalmada ahna taallo (waa haddii loo baahan yahay).
    - Waxaad eegta in aad la shaqeyso hayadaha si aad u hubsato in dhamaan ardaydu heysato aallado kuwada xiran qadka.
4. Waxaad suurto gal uuga dhigtaa dadka reer Vermont iyo ganacsiyada in ay internetka shaqada, iskuulka, madadaalada iyo xanaanada caafimaadka iyo sababo kale u isticmaalan.
    - Waxaad hubisaa in dhamaan dadka reer Vermont ay heli karaan caawinaad ay ku bartaan sida loo isticmaalo kombiyuutarada iyo internetka si amaan leh. Caawinaada waxaa heli karo qof walbo, waxaana lagu heli kara luuqado badan.
    - Agabka sinaanta dijitalka ayaa la heli karaa, waxaana lagu turjumay luuqado badan, oo ay kamid tahay Luuqada Dhagoolaha Mareykanka iyo braille.
    - Waxaad sameysa taleefan nambar ay dadku soo wici karaan si ay wax uuga bartaan agabka sinaanta dijitalka.
    - Waxaad sameysaa barnaamij tilmaamaha dijitalka si loogu caawiyo dadka in ay helaan caawinaad sida loo isticmaalo internetka iyo kombiyuutarada walibana si amaan leh. Waxaad shaqaaleysiisa dad in ay noqdaan hagayaasha dijitalka oo laga soo dhex xushay bulshay si ay ugu adeegan.
    - Waxaad hubisaa in adeegyada bulshada hadda ay yihiin kuwo lagu heli karo hab onleyn ah.
5. Ku caawi in aad siido dadka reer Vermont shaqooyinka qadka iyo tiknolajiyada ama in ay bartaan xirfadaha dijitalka ee ka caawinaya in ay shaqooyin howlo kale ah ku helaan.

**Maxaa loogu tallo galay qorshaha?**

Qorshahu waxaa loogu tallo galay dhamaan dadka reer Vermont ayadoo si qaas ah ahmiyad loo siinayo bulshooyinka loo garto in ay caqabado badan kala kulmayaan in ay qadka kusoo biiraan iyo kuwa kale:

- Dadka daqliga yar (guryaha daqliga soo gala uu ka yar yahay boqolkiiba 150 heerka faqriga)
- Dadka da'doodu ka weyn tahay 59 sanno
- Dadka xabsiyada ku jira
- Halyeey Hore (askartii hore)
- Dadka cuuryamada ah
- Dadka luuqada Ingiriiska baranaya ama ay ku adag tahay in ay aqriyaan
- Dadka xunbnaha ka ah kooxaha laga tirada badan yahay ama la takooro
- Dadka ku nool reer miyiga

**Waqtiga Soconeyso**

2024

- Waxaad sii wadaa in aad qaado faalloyinka shacabka
- Waxaad bilaawda barnaamijka hagaha dijitalka
- Waxaad sii wadaa in aad ka shaqeyso helida hayadaha saaxiibada shaqo
- Waxaad ku abaalmarisa gunooyin (lacagaha hayadaha kale ee qabashada shaqooyinka sinaanta dijitalka)
- Waxaad sameysaa sahminta sinaanta sanadlaha ah

2025

- Bilaaw barnaamijyo
- Waxaad bilaawda bogga lasocoshada sinaanta dijitalka (website muujinaya sida ay horumar uuga sameyneyso sinaanta dijitalka ah)
- Waxaad qortaa warbixinta/riboorka sinaanta dijitalka
- Waxaad sameysaa sahminta sinaanta dijitalka sanadle ah

2026

- Waxaad sii wadaa barnaamijyada
- Waxaad sii wada bogga lasocoshada sinaanta dijitalka
- Waxaad qortaa warbixinta/riboorka sinaanta dijitalka
- Waxaad sameysaa sahminta sinaanta dijitalka sanadle ah

2027

- Xaqiiji ama ansaxi in barnaamijyadu yihiin kuwo is wadi karo (sii socon karo)
- Waxaad sii wada bogga lasocoshada sinaanta dijitalka
- Waxaad qortaa warbixinta/riboorka sinaanta dijitalka
- Waxaad sameysaa sahminta sinaanta dijitalka sanadle ah

2028

- Waxaad dib u qiimeyn ku sameysaa barnaamijyada si loo hubiyo in ay isbixin karaan
- Waxaad sameysaa sahminta sinaanta dijitalka sanadle ah
- Waxaad sameysa qorshe midkii ugu danbeyay ee sinaanta dijitalka

**Hiigsiyada Qorshaha Sinaanta Dijitalka Vermont ee 2034**

- Dhamaan guryaha Vermont waa in ay lahadaan adeeg internet leysku haleyn karo misna la awoodi karo (qadka internetka) oo ay heli karaan haddii ay u baahdan in ay helaan.
- Ugu yaraan 90% dadka reer Vermont waa in ay doortaan adeega.
- Ugu yaraan 70% dadka u qalma caawinaad awoodida adeegoda waa in ay isku diwaan geliyaan in ay caawinaad u baahan yihiin.
- 95%guryuhu waa in ay heystaan laabtoob, taablet, ama kombiyuutar.

- 80% dadka reer Vermont waa in ay dhahaan waan naqaana sida loo isticmaalo internetka waliba si amaan leh.
- Ugu yaraan waa in ay jiraan 200 shaqooyin cusub oo qadka internetka ah.
- Dadka reer Vermont waa in ay heli karaan misna isticmaali karaan internetka si ay u ogadaan ama u isticmalaan adeegyada ay heli karaan.
- Xafiisyada gobolka iyo hayadaha bixiya caawinaada dadka waa in ay sinaanta dijitalka ka dhigaan qeyb kamida ah adeegyadooda.

**Waxaan rabnaa in aan wax kaa barano**

- Maxaa kaa hortaagan in aad si faa'iido leh ugu isticmaasho kombiyuutarada iyo internetka?
- Waxaad wax inooga sheegta waxa aad dareento marka aad la tacaaleyso dhibaatoyinka helida internet la awoodi karo misna leysku haleyn karo iyo kombiyuutaro iyo kobcinta xirfadaada kombiyuutarka?
- Maxaa kaa caawin doono in aad noqoto mid ku xiran internetka?
- Haddii ay jiraan barnaamijyo diirada saaraya barida kobcinta xirfadaha dijitalka ah, maxey tahay in ay kusoo daraan?
- Waligaa ma heyshay barnaamijyo ama adeegyo adiga aad kuu caawiyay?
- Sidee ula xiriirta dadka laga yaabo in ay u baahan yihiin in laga caawiyo helida ama isticmaalka kombiyuutarada/internetka? Yaa ah saaxiibo ay bulshadu ku kalsoon tahay oo ay tahay in aan la shaqeyno?

Haddii aad qabto wax su'aallo ah oo ina quseya, iimeyl inoogu soo dir vcbb.info@vermont.gov.